




**GANACSIGAAGA,
MUSTAQBALKAAGA**

Tilmaamaha asaasiga
ah ee dadka qaxootiga



Mahadnaq

Tilmaamahan waxaa soo saaray Ururka Isbahaysiga Qaxootiga New York iyo Xarunta Prat ee Horumrinta Bulshada oo ah qayb ka mid ah dadaal lagu kordhinyo in la helo warbixin buuxda iyo kaydka aqooneed ee la siinayo qoxootiga ganacsiga ka bilaabaya New York. Daabacadda tilmaamahaan waxaa maalgelintiisa ku deeqday Capital One, Waaxda Dhalinyarada iyo Horumarinta Bulshada ee NYC, Golaha Deegaanka New York iyo Xafiiska Af-Hayeenka, oo ay ay horseed u tahay Ururka Isbahaysiga Qaxootiga New York.

Waxaa la Daabacay April 2019

Waxaa naqshadeeyey Ben Dodd, oo ay taageerayaan Sydney Cespedes, Sal Munoz

Sawirada waxa raaciyey Jun Lee



Xarunta Isbahaysiga Qaxootiga New York

Isbahaysiga Qaxootiga New York waa urur samafale ah oo leh aragti New York oo xoog badan sababta oo ah dadkoo dhan waa la soo dhoweynayaa, si isku mid ah ayaa loola dhaqamayaa, waxaana la siinayaa fursad ay riyadooda ku gaaraan. Isbahaysigu wuxuu midaynayaa qaxootiga, saxiibada iyo dadka deggan si New York hore ugu socoto.

Xarunta Prat ee Horumarinta Bulshada

Xarunta Prat ee Horumarinta Bulshada waxay isu keentaa qorshe magaalada, cilmi baarista, u doodidda nidaamka, gargaarka ganacsiyada yaryar si loo dhiiri geliyo bulshada dakhligoodu yar yahay ama meel dhexaad yahay si loo qorsheeyo loona gaaro aayahooda loona helo New York loo siman yahay lana wada xajiyo.



TUSMADA BUUGGA

Bilaabidda Ganacsiga? Maxaad u baahan tahay in aad ogaatid!	6
Sidee u isticmaalaysaa tilmaamahan.....	6
Hadda Bilow.....	7
Tilmaamaha sidii aad u doorran lahayd Dhismaha Ganacsiga.....	11
6da Qaab ee Dhismaha Ganacsiga	15
Keligii Mulkiile.....	16
Wadar Lahaansho Guud (Shirko Guud).....	17
Shirko Kooban	19
Shirkad qaanteedu (Daynteedu) Kooban tahay	21
Shirkad Weyn	23
Iskaashato Shaqaale.....	26
Qeexid	27
Dokumentiga Muhiimkaa ah	28
Kaydka aqoonta ee ku caawima	29

Fariinta Af Hayeenka Golaha Deegaanka New York Corey Johnson


Deganaha Qaaliga ah ee New York,

Magaalada New York oo aan naqaan, aan jecelnahay waxba ma ahaateen haddii aysan jirin qaxooti ganacsi bilaaba. Qaxootigu waa laf dhabarta dhaqaalah gudaha, oo ay ka qaybgalaan dad badan oo shaqaysta iyo ganacsato ganacsi iska leh. Run ahaantii dadka soo degay waxay leeyihiin kalabar ganacsiga Magaalada New York, waxayna ku soo biiriyeen 2017 dhaqaalaha magaalada \$228 bilyan waxaase jira waxoogaa kayd aqooneed ah oo kaalmayn kara qaxootiga ganacsiga iska leh. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku soo biiriyo kaydka wax qabadka magaalada adeeg kaalmayn kara dadaalka lagu korinayo dhanka ay ganacsatada qaxootigu ganacsiga ay kaga jiraan. Waa talaabo muhiim ah in aan hubino sidii aan uga leexin lahayn wax kasta oo hortaagan guusha ay rabaan dhamaan dadka New York.

Kadib markii ay soo weerartay dowladda dhexe qaxootiga sida wayn u shaqeeya, waxaan ku faraxsanahay in Golaha Deegaank New York ay taageereen in la abuurro Tilmaamahaan. “Ganacsigaaga waa Mustaqbalkaaga” wuxuu ka soo baxay wada tashiyo badan oo ay yeesheen sharci yaqaano qaxooti, ganacsiga, Canshuurtaha, kooxaha kaalmeeya qaxootiga iyo ganacsatada bilowga ah. Siyaabo badan, waa noocii ugu horeeyay. Tilmaamahaani wuxuu ku siinayaa wadda cad iyo warbixin kaalmaysa dhamaan qaxootiga New York ee doonaya in ay ganacsi furtaan laakiin aah hubin talaabadii ay marka hore qaadi lahaayeen ama ganacsigii ay ku bilaabi lahaayeen.

Ma aha oo keliya in Tilmaamahaani uu qalab muhiim ah u yahay dadk reer New York, laakiin daabacaadiisa waqtigaan ahi waxay fariin culus oo ka timi Golaha u diraysaa in qaxootiga New York lagu soo dhowaynayo halkaan oo aan qadarinayno waxa weyn ee ay ku soo biiriyeen Magaalada. Waxaan rajaynayaa in Tilmaamahaani uu dhiiri geliyo dhamaan dadka New York si ay u qaadaan talaabada xigta.

Adeegyada,



Af Hayeenka Golaha Deegaanka New York
Corey Johnson

Fariint ka timi Agaasimayaasha Fulinta

In ka badan 150 sano, New York waxa ay u abuurtay fursado wanaagsan qaxootiga. Iyaguna dhankooda waxay xoojiyeen dhaqaalaha. Qaxootigu waxay yihiin rubuc dadka ka shaqeeya New York, waxayna dakhliga gudaha ku soo biriyaan balaayiin doolar. laakiin qaxootigu ma aha xooga shaqaale ee New York keliya, waxayse u yeelaan muuqaal: in kabada 83,000 oo New York Ganacsi ku leh waa qaxooti, oo leh inta badan ganacsiga yaryar.


Ururka Isbahaysiga qaxootiga iyo Xarunta Prat ee Horumarinta Bulshada waxay ku faraxsanyihiin in ay ku siiyaan tilmaamahaan oo ah wax ka caawimaya qaxootiga bilaabaya ama adkaynaya ganacsi guulaysta. Waxaa jira shabakado si weyn isugu xirran oo bulshada dhexdeeda ah, meelo ganacsiga lagu dhiso, ganacsi yar yar, adeegyo, talabixiye sharci oo siin kara adeegyo ganacsatada bilowga ah, laakiin qaar dadkaasi ka mid ah waxay la kulmaan qoraalo ku qorran af aysan aqoon. Tani waa arrin wada haysata ganacsatada bilowga ah, gaar ahaan qaxootiga marka laga eego luqadda iyo dhaqanka oo ka hor yimaada.

Tilmaamahaan waxaa lagu eegayaa qaar ka mid ah caqabadaha ka horyimaada dadka qaxootiga ah wuxuuna siinaya warbixin luqado badan ku qoran. Kaydka aqoonta waxay kaalmaynaysaa ka qaybgalayaasha bulshada ee hawsha ganacsiga ku dhex jira in ay helaan adeeg ganacsi waxtar u leh bulshada ganacsatada qaxootiga ah. adeegga qaxootiga ganacsiga bilaabaya iyo shaqooyinka ay abuuraan waxay waxtar u leedahay guud ahaan horumarinta dhaqaalaha New York waxayna fursado waa wayn u horseedaysaa dhamaan dadka New York.

Mahadsanidin



Steve Choi
Agaasimaha Fulinta
Ururka Isbahaysiga qaxootiga New York



Adam Friedman
Gaasimaha Fulinta
Xarunta Prat ee Horumarinta Bulshada

BILAABIDDA GANACSIGA WAXA LAGAA DOONAYO IN AAD OGAATO!

Sidee loo isticmaalaa Hagaha

qaxootiga ganacsiga bilaaba waa lafdhabarta dhaqaalaha waddankaan. Gobolka New York, ganacsatada qaxootiga ah waa 33.8% ee dadka deggan oo iskood u shaqaysta, waxay ku soo biiriyaan \$7.2 Bilyan dhaqaalaha ganacsiga ka yimaada.¹ Inkastoo ganacsatada qaxootiga ahi ay laba jibaar ka badan yihiin dadka ku dhashay Marayknaka oo ganacsi bilaabay, haddana waxoogaa kaalmayn ah oo si gaar ah loogu talagalay ganacsiga qaxootiga ayay helaan.²

Tilmaamahaan waxaa loogu talagalay dhamaan qaxootiga rajaynaya in ay bilaabaan ganacsi ama hadda ku jira, xaalad kasta qaxootinimadoodu ha ahaatee, si loogu caawimo barta ay ka bilaabi lahaayeen ganacsiga iyo sida ay ganacsiga u wadi lahaayeen New York gudeheeda. Hagaha wuxuu ku siinaya sharaxaad guud waxaana ku jira warbixin kaa kaalmaynaysa nooca dhismaha ganacsiga kugu haboon, waxa aad u baahantahay si aad ganacsi u samayso iyo lacagaha adeegga iyo tan canshuurta si ganacsigaagu u sii furnaado.

Hagaha ma kuu sheegayo shatiga ama ogolaansho xirfad gooni ah looga baahanyahay. **Tilmaamahaani ma kuu sheegayo talabixin xagga sharciga ah ama canshuurta ah.** Qaxootiga ganacsiga bilaabaya waxaa lagu dhiiri gelinaya in ay raadsadaan talo bixin sharciga ah oo la xiriirta qaxootinimadooda gaarka, ganacsigooda, canshuurta laga rabo iyo xayiraadaha ku imaan kara. Wixii warbixin dheeri ah ka fiiri kaydka aqoonta ee tilmaamahaan. Warbixinta ku qoran Hagaha waxaa la diyaariyay Oktoobar 2018 mana la cusboonaysiinayo.

1. "Qaxootiga New York" (Oktoobar 4, 2017) American Immigration Council. www.americanimmigrationcouncil.org/search/immigrants-in-new-york

2. "Arrinta Dhaqaalaha lagu soo dhoweynayo qaxootiga ganacsi bilowga ah" (Sitembar 8, 2015) Kauffman Foundation.

www.kauffman.org/what-we-do/resources/entrepreneurship-policy-digest/the-economic-case-for-welcoming-immigrant-entrepreneurs

Bilowga Ganacsiga

Qandaraasle xor ah lala barabardhigo Shaqaaleyn? (maxaa ku jaban)

Qaxooti badan waxaa ka hor yimaada caqabado badan si ay Maraykanka uga helaan shaqooyin lacag badan bixiya. Lahaanshaha ganacsiga waxay siinaysaa qaxootiga fursad ay dhqalahooda ku hormariyaan. Gaar ahaan haddii aan lagu ogolayn in aad ka shaqayso Maraykanka shaqaale ahaan, in aad bilowdo ganacsi aad adigu leedahay waxaad ka helaysaa wax aad ku noolaatid.

Waa sharci daro in qof shaqaalaysto qof aan loo ogolayn in uu Maraykanka ka shaqeeyo. Qof kasta oo shaqaale qoranaya waa in uu cadeeyaa in qofka uu qortay loo ogolyahay in uu ka shaqeeyo Maraykanka.

- ▶ Buuxi Foomka I-9
- ▶ Hubi aqoonsiga shaqaalaha sida (labarka bulshada, deganaashaha wadanka. Baasaboorka) iwm.

Ma jiro sharci federaalka ah ama mid Gobolka New York ah oo u diidaya qof qaxooti ah oo aan haysan warqad shaqo tegid in uu yeesho ganacsi, ama uu noqdo qof asagu shaqo isu abuura. Shaqa isu-abuuraha ganacsi bilaaba waxaa loo yaqaan “Qandaraasle Xor ah”. Qandaraaslaha Xorta ah mar kasta lagama rabo in macaamiishisa uu ka buuxiyo Foomka I-9 markasta oo uu qandaraas (heshiis) cusub bilaabo. Haddii aad u furtid ganacsi sida hay’ad sharci ah oo gooni ah sida ku xusan Hagaha, hay’da lafteeda ayaa ganacsi samayn karta oo ay ku jirto qandaraaska ganacsiga adeega iyo badeecadda.

Sida dhabta ah qaxooti badan ayaa heli kara wax ay ku noolaadaan iyagoo bilaabaya ganacsi xaalad kasta oo qaxootinimo ay dalka ku joogaan. Waxaa muhiim ah haddaad ganacsi bilowdo in aad ilaalisid sharciga lagu wadayo ganacsiga oo ay ku jirto bixinta canshuurta. Waa in aad fahamsantahay bilaabidda ganacsi waxay kaa rabtaa in aa ddukumentu u gudbisid hay’adaha dowladda iyo Bangiyada, taasi kaama baajinayso in lagaa tarxiilo Maraykanka, kumana siinayso waddo sharci ah. Waxaase laga yaabaa marka qaalligu dhagaysanaya xaaladdaada in uu u samafalo qof leh ganacsiga oo canshuurta bixiya.

Sidee ku ogaan kartaa in aad tahay qandaraasle xor ah

Waa adagtahay in la kala garto in aad tahay qandaraasle xor ah iyo in aad tahay shaqaale, marka waa in aad heshaa talo bixin sharci ah oo ku saabsan xaaladda gaarka kuu ah.

Qandaraaslayaasha xorta ah waxay ku dhex jiraan ganacsi ay ayagu leeyihiin waxayna macaamiisha ka iibiyaan adeegyo iyo badeecooyin. Sida aad u maamulaysid badeecada iyo adeegga aad bixinaysid, kana duwan sida qof shaqaale ah, waxay tusaysaa sida dhab ahaan aad u tahay qof ah ganacsade xor ah oo aan shaqaale ahayn. Bogga soo socda waxaad ku arki doontaa tusaale liis warbixineed isbarbar dhigaya xaaladda shaqaalaha iyo qandaraaslaha xorta ah.

Hadii aad ganacsigaaga si gooni ah ugu samaysid sida hay'ad sharci ah, hay'addaas ayaa macaamiisha (adeegatada) siinaysa adeeg iyo badeeco. **Si guud laguuma aqoonsanayo shaqaale haddii aad addigu leedahay aadna maamushid ganacsiga.** Sababtaas darteed waxaa loo soo jeedinaya in ganacsatada bilowga ah oo aan haysan ogolaansho shaqo tegid in ay:

- ▶ Yeeshaan dhamaan ama qayb weyn oo kamid ah ganacsigooda.
- ▶ Ayna xukumaan wadidda ganacsigooda.

Shaqaale mise Qandaraasle xor ah?

Waxaan u shaqeeyaa sida adeege guri waxaan u fidiyaa adeegayga macaamiil badan. Waxaan leeyahay bog internet oo sharaxaysa kharashka iyo adeegga aan bixiyo. Macaamiishu waxay dalban karaan adeegayga iyagoo ballan ku qabsanaya bogga internetka ama telefoon. Macaamiishu iyagaa la imaanaya qalabka iyo walxaha nadaafadda lagu sameeynayo.

Waxaan adeege guri ugu shaqeeyaa qoys Isniinta illa Jimcaha 8:00 subaxnimo illa 4:00 Galabnimo. Waxaan ku gorgortamay saacaddii \$15 sannadkiina waxaan ku gorgortamaa in la ii badiyo sida ay maciishaddu u badatay. Qoyska aan u shaqeeyo iyagaa keena waxyaabaha wax lagu nadiifiyo. Maalin walba waxay ii qoraan waxyaabaha ay tahay I la qabanayo iyo sida loo qabanayo.



Adeege Guri A



Adeege Guri B

Ogow rugta ganacsiga	<input type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Maalgelinta ku baxaysa rugta, qalabka, walxaha, iyo qalabka kala duwan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Mas'uuul ka tahay dhaqaalaha, khasaaro iyo faa'iido	<input type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Qoro ama ka gorgortan inta saacadii aad rabtid	<input checked="" type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Ma dooran kartaa in shaqaalaysid qof ku kaalmeeya	<input type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Ma diidi kartaa shaqo lagu soo bandhigay	<input type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Ma siin kartaa adeegyo macaamiil kale	<input checked="" type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>
Ma xukuntaa sida, goorta iyo meesha shaqada laga qabanyo	<input type="checkbox"/>	<input checked="" type="checkbox"/>

waxaan ahay
shaqaale

Waxaan ahay
qandaraasle xor ah

Shaqaale mise qandaraasle xor ah

Waxaan xisaabiye u noqdaa shirkad marka ay adeegayga u baahany tahay. Marka shirkaddu i rabto waxay gooyaan maalmaha aan shaqada qabanayo iyo inta saacadood ee aan shaqaynayo. Waxa la isiinayaa wixii aan shaqaysta marka shaqadu dhamaato mana aha qiima saacadle ah. Marka aan rabo in la isiiyo waxa aan shaqaystay waxaan u diraa shirkadda qaansheegato. Waxaan shaqo xisaabiyanimo ugu shaqeeyaa shirkado kale oo badan. Waxaa ku shaqeeyaa xafiis gurigayga ku yaal, waxaan isticmaalaa kumbiyuutarkayga.

Waxaan shaqeeyaa 30 saacadood todobaadkii, xisabiye ahaan, waxaan qataa mushahaar todobaadle ah. Inta badan waxaan ka shaqeeyaa guriga anoo isticmaalaya kumbiyuutarkayga. Haddii aan rabo waxaan shirkadda aan u shaqeeyo ka codsan karaa ceymiska caafimaadka. Mararka qar waxaan shaqo ka qataa shirkhaddo yayar oo kale marka aanan u shaqaynayn shirkadaan.



Xisaabiye A



Xisaabiye B

Ogow Rugta Ganacsiga



Maalgelinta ku baxaysa rugta, qalabka, walxaha, iyo qalabka kala duwan



Mas'uul ka tahay dhaqaalaha, khasaaro iyo faa'iido



Qoro ama ka gorgortan inta saacadii aad rabtid



Ma dooran kartaa in aad shaqaalaysid qof ku kaalmeeya



Ma diidi kartaa shaqo lagu soo bandhigay



Ma siin kartaa adeegyo macaamiil kale



Ma xukuntaa sida, goorta iyo meesha shaqada laga qabanyo



waxaan ahay shaqaale

Waxaan ahay qandaraasle xor ah

Sida aad ku dooran kartid Qaab Dhismeedka Ganacsiga

Hadda waxaad go'aansatay in aad ganacsi bilowdo, waxaad u baahantahay in aad ogaatid nooca ganacsiga kugu haboon. Qaybtaan waxay ku siinaysaa fursadaha kala duwan ee kuu furan si aad u dhistid ganacsigaaga.

Qaabka dhismeedka ganacsiga qaarkiis wuxuu leeyahay xeerar adag iyo kharash badan oo loo baahan yahay in lagu xereeyo bilowga hore. Ganacsiyada qaar waa fududyihiin in la sameeyo oo u baahan kharash yar iyo dhowr waraaqood, laakiin qofka iska leh ganacsiga wuxuu la kulmayaa qatar maaliyadeed oo weyn. Si aad u dooratid qaab dhismeedka ganacsiga baahidaada ku haboon waxaa muhiim ah in aad fahamtid fikradaha asaasiga ah ee ku saabsan qaababka ganacsi ee Gobolka New York.

Ilaalinta Maaliyada shaqsiga ah

Ganacsi wuxuu noqon karaa hay'ad si sharci ah oo iskeed gooni ugu taagan kana duwan qofka ganacsiga iska leh. Hay'ad sharci ah sida qof, waxay yeelanaysa awood sharci oo ay ku gasho heshiis ama qandaraas, waxay qaadan kartaa dayn, waxay qabi kartaa dayn, waa la dacwayn karaa waxna way dacweyn kartaa, waxayna mas'uul ka noqotaa ficilkeeda.

Marka ganacsigaagu yahay hay'ad gaar ah oo si sharci ah u jirta, waxaad yeelan kartaa **daynta shaqsiga oo kooban**. Daynta aad adigu ka qabtid ganacsiga waxay ku egtahay inta aad adigu gelisay ganacsiga. Haddii ganacsigaagu yahay hay'ad gaar ah oo si sharci ah u jirta oo la dacweeyo, hantidaada shaqsiga ah sida gurigaaga, gaarigaaga, inta badan way badbaadayaan lamana qabsanayo si loo daboolo qaanta (daynta) loo haysto ganacsiga. Faa'idada kale oo ay leedahay in ganacsiga laga dhigo hay'ad si sharci ah u jirta hay'adda lafteeda ayaa si sharci ah u samayn karta ganacsi xitaa haddii aan mulkiilaha loo ogolayn in uu shaqeeyo ama uu ganacsiga ka maamulayo asagoo ka maqan Maraykanka.

Tilmaamahaan waxaan ku soo koobaynaa kharashka iyo faa'iidooyinka ay leeyihiin noocyada soo socda ee ah hay'ado sharci ah ee laga abuurri karo Gobolka New York si loo yareeyo qaanta shaqsiga ah: Shirko Kooban, Shirkad daynteedu Koobantahay, iyo Shirkad weyn.

Si ganacsigaagu uga faa'iido **mas'uuliyad kooban** ee ay leedahay hay'adda si sharci ah oo iskeed u jirta:

- ▶ Hubi in hantida shaqsiga ah ee aad leedahay ay ka duwan tahay hantida ganacsigaaga
- ▶ Fur xisaab bangi oo gooni u ah hay'adda sida sharci ah u jirta.
- ▶ Isticmaal magaca hay'adda sida sharci ah u dhisan marka aad gelaysid qandaraas, xayaysiis (si ka duwan magacaaga)
- ▶ Codso lambar aqoonsi canshuurta gooni u ah (EIN) si gooni ah u xeray canshuurta hay'adda sida sharci ah u jirta marka loo baahdo.



Waa maxay ITIN?

Marka dakhli ku soo galo waa waajib in aad bixisid canshuur. Lambarka aqoonsiga gaarka ah ee canshuur bixiyaha waxaa soo saara Hay'adda Canshuuraha (IRS) waxayna siisaa dadka aan la siin karin lambarka badbaadada bulshada (SSN) laakiin laga rabo canshuur. Haddii aad leedahay lambarka SSN laguma siin karo lambarka ITIN. Xitaa haddii ogolaanshaha in aad shaqayn kartid uu kaa dhaco, lambarkaaga SSN mar kasta waxaa jirta sababtii laguu

siyay ee ah In aad xeraysid canshuurta. Waxaad kaloo ITIN u isticmaali kartaa in aad heshid adeegyo maaliyadeed oo ay ku jiraan kaarka dayn qaadashada, ama furista xisaab bangi, xaalad kasta oo qaxootinimo aad leedahay. Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa "Lacagtaada, Mustaqbalkaaga"! waa Hage Asaasi u ah Aqoonta Maaliyadda iyo Awood u yeelidda, waa xog ay qaxootigu ka heli karaan fahmidda u gaarka ah ee maaliyadda.

Waa maxay EIN?

Xagga Dowladda Federaalka ah iyo midda Gobolka New York waa in ganacsi kasta oo shaqaale qoranaya uu leeyahay Lambarka Aqoonsiga loo shaqeeyaha (EIN). Shirkadaha waawayn iyo inta badan shirkadaha mas'uuliyaddoodu kooban tahay waa in ay leeyihiin EIN.


Sidoo kale bangiyada waxay u baahan yihiin EIN si ay ganacsiga ugu furaan xisaab. Si loo helo EIN, waa in ganacsigu u soo gudbiyaa Hay'adda Canshuuraha (IRS) Foomka SS-4 ama telefoon ama intarneetka (Application for Employer Identification Number).

Marka aad adiga iyo ganacsigaagu isku tihiin hal hay'ad si sharci ah u jirta



Hantidaada shaqsiga ah qatar bay ku jirtaa

Marka ganacsigaaga uu si gaar ah u yahay hay'ad si sharci ah u jirta...



Ganacsigaagu wuxuu qaadan karaa dayn, wax waa dacweyn kara, qandaraasna waa geli karaa.

Hantidaada shaqsiga ahna way badbaadaysaa!

Faham canshuurta wajibka ku ah ganacsigaaga

Iyada oo aan loo eegin sharciga aad waddanka ku joogto, Maraykanka gudihiisa qof kastaa oo dakhli soo galo waa in uu bixiyaa canshuurta Dawladda Federaalka ah, midda Gobolka iyo midda dowladda hoose. Canshuurta lagaa rabo waxay ku xirran tahay waxyaabo badan oo ay ka mid tahay in aad keli ku xeraynaysid, in aa xaas tahay, inta ku soo gasha, iyo meesha aad ka deggan tahay New York.


Si guud mararka qaab dhismeedka ganacsigaagu fudud yahay canshuurta laga doonayona waa fududahay. Waxaa jira qaab dhismeed ganacsi oo kuu ogolaanaya in aad ka warbixisid dakhliga kaa soo gala ganacsiga marka aad xeraynaysid canshuurta dakhliga shaqsiga ah, taas oo ka dhigaysa in ay fududaadto diyaarinta casnhuurta mulkiilaha ganacsiga.

Fadalan la soco in tilmaamahaan aan loogu tala gelin in uu ku siiyo tala bixin canshuur. Qaxootiga ganacsiga bilaaba waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay ka raadsadaan talabixin canshuurta xirfadlayaal aqoon u leh Canshuuraha. Qaybta tixxraca ee tilmaamahan waxay tilmaamaysaa ururada aqoonta u leh in ay kaa kaalmeeyaan su'aalaha casnhuurta ee la xiriirta ganacsigaaga.

Isbarbardhigga Laba ganacsi

Shirkad Mas'uuliyadeedu kooban tahay*

Saaxiibo saddex ah ayaa bilaabay Ganacsi Dhul Hagaajin ah. Waxay ganacsigooda ku diiwaan geliyeen Shirkad Mas'uuliyadeedu Kooban Tahay (LLC). Shirkadooda (LLC) si gaar ah ayaa loo sharciyeeyay.




Qof kasta wuxuu ku maalgashaday \$400 oo lagu bilaabay, shirkaddu waxay dayn ka qaadatay bangiga.

Ganacsigii waa khasaaray waana la xiray dhowr bilood kadib waxaana lagu yeeshay dayn dhan \$8,000.



Qof kasta waxa ka lumaya waxay ku koobantahay \$400 ee uu gashatay shirkadda daynteedu koobantahay iyo wixii hanti kale oo shirkaddu lahayd.



Ganacsatadu si shaqsi ah mas'uul ugama aha daynta ay ku qaamaysantahay LLC, hantidooda shaqsi ahaaneedna way badbaadaysaa.




Keligi Mulkiile

Qof keligii mulkiile ah leh ayaa bilaabay dhul hagaajin. Asaga iyo ganacsiyiisa waa isku hal qof sida sharcigu qabo.



Waxay ku maal gashatay lacag kaydka u ahayd oo \$400 ah, kaarka dayntana waxay ku iibisay qalabki ganacsigeed cusub.



Ganacsigii waa khasaaray waana la xiray waxaana lagu yeeshay \$8,000 dayntii kaarka dayn qaadashada.



Shirkadda keli mulkiilaha waxay luminaysaa \$400 ay maal gashatay, waxayna mas'uul ka tahay in ay bixiso \$8,000 ee kaarka dayn qaadashada iyo wixii dul saar ah.



Haddii aysan bixin dayta, shirkadda leh kaarka dayn qaadashada waxay u imaanayaan hantideeda gaarka ah sida gaariga, guriga, iyo kaydka shaqsiiga ah si loo bixiyo daynta.



*Tusaalahaan waxana qaadanaay LLC, laakiin noocyada kale ee hay'ada sida sharciga ah loo sameeyay oo aan kaga hadli doono Tilmaamahaan waxay sidoo kale u koobaan daynta qof ahaaneed.

LIXDA QAAB DHIISMEEDKA GANACSIGA CAADIGA AH

Waxaa jira lix qaab dhismeed Ganacsi caadi ah Gobolka New York oo muhiim u ah qaxootiga ganacsiga bilaaba. Waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- **Keligi Mulkiile**
- **Shirko Guud**
- **Shirko Mas'uuliyad Kooban**
- **Ganacsi Mas'uuliyad Kooban (LLC)**
- **Shirkad weyn**
- **Iskaashato Shaqaale**

Tilmaamahaan wuxuu kuu dulmarayaa shanta dhisma ganacsi ee u horeeya. Iskaashato waxaa bilaabi kara shirko, LLC, ama shirkad weyn. Iyadoo ay jirto qaab dhismeed gooni u ah iskaashatada, Tilmaamahaan kama hadlayo wax yaabaha la isaga baahanyahay iyo waxa qasabka ah ee Iskaashatada. Wixii warbixin dheeri ah ka eeg qaybta kaydka aqoontaka.

Keligii Mulkiile

Ganacsiga Keli mulkiile waa dhisme ganacsi kan ugu fudud oo aad hawlgelin kartid ganacsiga. Waxaa laga yaabaa in aad u dhaqmaystay sidii qof keligii mulkiile ah haddii aad bixin jirtay adeeg ama aad badeecad iibisay adiga oo aan wax waraaqa ah ka xerayn xagga dowladda. Kharashka aad ku bilaabaysid waa yar yahay waayo wax lacag adeeg ah ma bixinaysid mana gudbinaysid foom sida looga baahan yahay dhismaha ganacsiyada kale. Waxaad ka warbixinaysaa dakhligaaga shaqsiga ah marka aad canshuurta xeraynaysid oo aad u fudud.

Soo koobidda Keligii Mulkiile

 <p>Tirada Mulkiilayaasha</p>	<p>1 Mulkiile</p>	<p>Qofku waa kan keliya ee ah mulkiilaha ganacsiga</p>
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	<p>Aad u fudud si loo bilaabo</p>	<p>Waxaa la sameeyaa marka aad howlaha ganacsiga bilowdid.</p>
 <p>Kharashka codsiga/Foomka</p>	<p>Ma jiro ama waa yar yahay</p>	<p><i>(adaa khiyaar u leh)</i> kharashka xeraynta oo caadi ah oo ku kala duwan degmooyinka, Magaca lagu qaatay Shahaadada, haddii magaca ganacsigu ka duwan yahay kan mulkiilaha.</p>
 <p>Diyaarinta Cashuurta</p>	<p>Ka sii fudud</p>	<p>Waxaad canshuurta dakhliga ku xeraynaysaa magaca ganacsiga marka aad xeraynaysid dakhligaaga shaqsiga ah.</p>
 <p>Daynta</p>	<p>Qatarta shaqsiga ah ee maaliyadda oo aad u saraysa</p>	<p>Mulkiilaha ganacsiga ayaa mas'uul ka ah dhamaan daynta iyo waajibaadka ganacsiga, hantidaada shaqsiga ahina waxay ku jirtaa khatar.</p>
 <p>Waxayabha mar kasta la iska rabo</p>	<p>Ma jiro dib u cusboonaysiin joogta ah/ xerayn iska socota</p>	<p>Uma baahnid in aad hay'adaha dowladda ka xeraysid waxyaabo dheeraad ah si aad u haysatid keligii Mulkiile ganacsiga.</p>
 <p>Ku haboon</p>		<p>Adeegga hagaajinta elektarooniga, dhul hagaajinta, Guri nadiifinta, wax baridda, wax qoridda iyo farshaxanka</p>

Shirko Guud

Shirko guud wuxuu si wanaagsan ugu shaqeeyaa laba qof iyo waxii badan oo ah mulkiilayaal ganacsi oo raba in ay wadaagaan mas'uliyadda maaliyadeed iyo khatarta islan gaara go'amada ganacsiga si wadajir ah. Tan waxay u shaqaysaa mulkiilayaal ganacsi oo is aaminsan waayo mid kasta wuxuu mas'uul ka yahay go'aanka mulkiilaha kale gaarayo.

Si la mid ah Keligii Mulkiile, waxaa jira wax yar oo waraaqo diiwaangelin ah ama maba jiraan si loo sameeyo Shirko Guud. Waa laga yaabaa in aadba hore ugu jirtay Shirko guud marba hadaad qof kale aad howlo ganacsi wadaagteen oo qof walba qofka kale mas'uulayda ganacsiga uu qabanayo uu aaminsana. Waxaa si weyn lagugula talinayaa in mulkiilayaashu kala qortaan heshiis oo ah dokumenti sharaxaya waxay ay tahay qof kasta xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa, intee qof kasta maal gashaday, sidee wax mulkiilayaashu u xalinayaan dhibaatooyinka. Haddii uusan jirin heshiis wax kale sheegaya, dhamaan faa'idada iyo qasaaraha waxaa loo qaybsanayaa si isle'eg. **Waxaad raadsan kartaa kaalmo sharciyeed marka la qorayo heshiiska shirko.**

Si taas la mid ah xaaladda keligii mulkiile, hantida shaqsiga ah ee Shirko Guud ma aha mid ilaalsan, hantida shaqsiga ah waxay geli kartaa khatar marka mid ka mid ah mulkiilayaasha uu gaaro go'aamo xun xun.



Heshiiska Shirkada

Heshiiska shirkada waa dukumentu muhiim ah oo sheegaya mulkiile walba xaqiisa iyo waajibaadkiisa ee ganacsiga la wadaago. Waxaa heshiiska shirko lagula talinaya mulkiilayaasha Shirko Guud sidoo kale waa laga raba mulkiilayaasha Shirko Kooban. Heshiiska mulkiilayaasha shirko wuxuu ka jawaabayaa su'aalaha soo socda:

- ▶ Intee ayey le'egtahay maalgashiga mulkiile kasta?
- ▶ Waa maxay mas'uuliyadda mulkiile ((La Wadaage) kasta?
- ▶ Sidee mulkiilayaashu (La Wadaagayaal) go'aanka u gaarayaan?
- ▶ Sidee mulkiilayaashu (La Wadaagayaal) u qaybsanayaan faa'idada iyo khasaaraha?
- ▶ Sidee mulkiilayaashu (La Wadaagayaal) ku xalinayaan iska hor imaadka?
- ▶ Maxaa dhacaya marka mulkiile (La Wadaage) goosto in uu ka baxo ganacsiga ama uu iibiyo qaybtiisii?

Soo koobid

 <p>Tirada Mulkiilayaasha</p>	<p>2 Mulkiile iyo wax ka badan</p>	<p>Mulkiilayaasha (La wadagayaal) ayaa iska leh ganacsiga.</p>
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	<p>Aad u fudud si loo bilaabo</p>	<p>Waxaa la sameeya marka aad howlaha ganacsiga bilowdid.</p>
 <p>Kharashka codsiga/Foomka</p>	<p>Ma jiro ama waa yaryahay</p>	<p>(<i>adaa khiyaar u leh</i>) kharashka xeraynta oo caadi ah oo ku kala duwan degmooyinka, Magaca lagu qaatay Shahaadada, haddii magaca ganacsigu ka duwanyahay kan mulkiilaha. Si adag waxaa lagu talinayaa in la sameeyo Heshiiska Shirko (Mulkiilayaasha).</p>
 <p>Diyaarinta Cashuurta</p>	<p>Ka sii fudud</p>	<p>Mulkiilayaashu (La wadaagayaal) waxay ka warbixiyaan dakhliga ganacsiga ee shaqsiga ah marka ay xeraynayaan canshuurta dakhliga. Waxaa kaloo la xeraynayaa waxa u soo noqda mulkiilaha.</p>
 <p>Daynta</p>	<p>Qartarta shaqsiga ee maaliyadda oo aad u saraysa</p>	<p>Mulkiile (La wadaage) kasta wuxuu si shaqsi ah ugu qaamaysan yahay ficilka mulkiilayaasha (La wadaagayaasha) kale. Hantida shaqsiga ah wax qatar ah kuma jirto.</p>
 <p>Waxayabha mar kasta la iska rabo</p>	<p>Ma jiro dib u cusboonaysiin joogta ah/ xerayn iska socota</p>	<p>Lagaagama baahna in aad dawladda wax gudbisid si aad u haysatid xaaladda sharciga ah ee ganacsigaaga.</p>
 <p>Ku haboon</p>		<p>Ganacsiga Qoyska • Mulkiilayaasha lahaa xiriir soo jireen ah, qofba qofka kale aaminsanyahay.</p>

Shirkad Mas' uuliyad Kooban

Shirko Kooban, waxaa jira laba nooc oo mulkiilayaal ah, Lahaansho (La Wadaag) guud iyo lahaansho (La Wadaag) kooban. **Lahaanshaha (La Wadaag guud) Guud** wuxuu u shaqeeyaa si la mid ah sida Keligi mulkiile ama sida Shirko Guud oo ay u maamulaan ganacsiga sidii shirko kooban ayna galaan heshiisyada, go'amada un dhaqmaan in ay wakiil ka yihiin shirko (mulkiilayaasha).

Mulkiile (La Wadaag) Mas' uuliyad Kooban waa maalgashi gaabis ah. Waxay geliyaan maal, waxayn qaataan qaybtooda faa'iidada laakiin kama qaybgalaan howlaha ganacsiga ee maalin walba mana matalaan mulkiilayaasha. Si ka duwan Shirkadda Guud, hantida shaqsiga ah ee mulkiilaha waa ilaashan tahay. Lahaanshaha ((La Wadaage) kooban dayntiishu waxay ku egtahay hantida uu geliyay ganacsiga.

Shirkadda Kooban wuxuu u baahan yahay hawl badan si uu u bilaabo ganacsiga, si ka duwan keligii Mulkiile ama Shirko Guud, waayo waxaa la rabaa in aad waraaqo ka xeraysid Waaxda Gobolka New York oo aad bixisid kharashka la xiriira bilaabidda ganacsiga. Qaab dhismeedka ganacsigaan wuxuu u fiican yahay mulkiilayaasha aan rabin in ay maamulaan ganacsiga ama mas'uul ka noqdaa go'amada ganacsiga ee (La Wadaagayaal) Guud. Waxa ay ku shaqaynayso Shirko Kooban waa in ay ku qorantahay Heshiiska Lahaanshaha (Shirko) Mulkiilayaasha.



Ku wargelinta Wargaysyada

Waxaa laga rabaa shirkadaha Kooban iyo kuwa Mas' uuliyadda Kooban (qaan) in ay laba warygays oo kala duwan ku daabacaan ganacsigooda. Kharashka daabacaadda waxay noqon kartaa qaali, taasoo ku xirran degmada aad joogtid.

Shirkad (Lahaanshaha) Guud

- ▶ Maalgelin ayay ku sameeyaan waxayna qaataan faa'iidada qaybtooda.
- ▶ Waxay maamulaan ganacsiga waxayna gaaraan go'aamo
- ▶ Waxay matalaan mulkiilayaasha shirkadda
- ▶ Waxay si shaqsi ah ugu qaameeysanyihiin daynta ganacsiga. (Mulkiilaha ganacsiga wuxuu samayn kara hay'ad sharci ah oo gaar ah una shaqaysa sida mulkiile (La wadaage) Guud oo leh Dayn Kooban, tan waa wax hawl badan).

Lahaansho (La Wadaag) Kooban

- ▶ Maalgelin ayay ku sameeyaan waxayna qaataan faa'iidada qaybtooda
- ▶ Ma maamulo Ganacsiga
- ▶ Ma matalaan mulkiilayaasha Shirkadda (Lahaanshaha)
- ▶ Hantida shaqsiga ah waa ilaashantahay. Dhibta Maaliyadeed waxay ku egtahay hantida uu geliyay.

Soo koobid Shirko Kooban

 <p>Tirada Mulkiilayaasha</p>	<p>Laba Mulkiile iyo wax ka badan</p>	<p>Waxaa jira laba nooc oo mulkiilayaal ah, ugu yaraan mid ayaa loo baahanyahay: (La Wadaage) (Lahaansho) Guud ama (La Wadaage) Kooban</p>
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	<p>Waxay u baahan tahay dadaal badan si loo bilaabo</p>	<p>Waxaa la raba dukumenti si loo sameeyo shirkadda:</p> <ul style="list-style-type: none"> ▶ Shahaadada Shirko Kooban ▶ Shahaadada Dabacaada Wargeysyada iyo dhaarta qoraalka ah (daabacaadda Wargeysyada kadib)
 <p>Kharashka codsiga/Foomka</p>	<p>Waxoogaa waa qaali</p>	<p>\$200 kharashka xeraynta, \$50 kharashka xeraynta Shahaadada, \$600 – 1,200 kharashka daabacaadda qoraalka wargeyska. Heshiis shirko ayaa la sika rabaa.</p>
 <p>Diyaarinta Cashuurta</p>	<p>Waa fufudahay</p>	<p>Waxaad canshuurta dakhliga ku xeraynaysaa magaca ganacsiga marka aad xeraynaysid dakhligaaga shaqsiga ah. Waxaa kaloo la xeraynayaa warbixinta canshuurta shirko.</p>
 <p>Daynta</p>	<p>Khatarta qofeed ee La Wadaage (Lahaanshaha) Guud waa saraysaa</p>	<p>Mulkiile kastaa (La Wadaage) Guud wuxuu mas'uul ka yahay daynta ganacsiga. Daynta La Wadaage Kooban waxay ku egtahay inta ay ku maalgashadeen ganacsiga.</p>
 <p>Waxayabha mar kasta la iska rabo</p>	<p>Haa</p>	<p>Waxaa loo baahan yahay Heshiiska Shirkadda oo qoran oo ay saxiixeen mulkiilayaasha (La wadaagayaal) Shirkadda Guud.</p>
 <p>Ku haboon</p>		<p>Bilaabayaasha Ganacsiga ee wax wada wadaaga oo raba in ay maalgashi sameeyaan laakiin aan doonayaan in ay go'amada wax ku yeeshaan ama dayn shaqsi ah aan lagu yeelan.</p>

Shirkad Mas'uuliyad Kooban

Shirkadda Daynta kooban (LLC) waxay leedahay dayn xadidan ama maalgelin shaqsi ah oo qatarteedu yartahay, kana faa'ida badan Keligii Mulkiile iyo dhismaha Shirko. Sharci ahaan shirkadda ganacsiga waa hay'ad si sharci ah gooni ahaan u jirta oo ka duwan mulkiilayaasha, dhamaan mulkiilyaash hantidooda gaarka ah waa ilaashantahay. Si mulkiiluhu u haysto shirkad Mas'uuliyadeedu Kooban Tahay waa in mulkiiluhu bangiga ka furaa xisaab gooni u ah (LLC), uu ku maalgeliyaa hanti ku filan LLC oo iska bixin karta kharashkeeda, aan isku qasyan hantida gaarka ah iyo midda ganacsiga kharashkooda.

Mulkiilayaasha loo yaqaan xubnaha LLC, waxay dooran karaan in ay iyaga laftoodu maamulaan ganacsiga ama u xilsartaan maareeye u maamula. Maareeyaha waa shaqaale waxaana loo ogolaaday in uu shaqeeyo. **Arrintaan xagga sharciga ma cadda, marka dadka aan loo ogolayn in ay shaqeeyaan waa in aay raadsadaan talo bixin sharci ka hor inta aan laga dhigin maareeye LLC xitaa haddii ay yihiin mulkiilayaasha LLC.**








Xubnaha LLC waxay dooran karaan sida loo Canshuurayo shirkadda marka la sameeyo. Haddii aan hay'adda IRS laga xerayn in shirkadd loo canshuuro sida shirkad LLC ah, mulkiilayaashu waxay dakhliga ganacsiga u xeraynayaan sidii uu dakhligu yahay mid shaqsi ah marka ay canshuurtaa xeraynayaan.



Heshiiska Hawl galka

Heshiiska hawl galgalka waa dukumenti muhiim ah oo ay isticmaalaan LLC oo xadidaya xuquuqda, awoodda, iyo mas'uuliyadda xubnaha. Heshiiska hawl galka waxaa la geli karaa ka hor, isla waqtiga, ama 90 maalmood gudohood kadib marka la xereeyo Xeerarka Ururka.

Soo koobid Shirkad Dayn Kooban

 <p>Tirada Mulkiilayaasha</p>	<p>Hal Mulkiile ama ka badan</p>	<p>LLC waxay yeelan kartaa hal xubin mulkiile ah ama xubno mulkiilayaal badan ah.</p>
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	<p>Waxay u baahantahay hawl badan si loo bilaabo</p>	<p>Waxaa loo baahanyahay dukumentiyoy:</p> <ul style="list-style-type: none"> ▶ Xeerarka Ururka ▶ Shahaadada Daabacaadda iyo Qoraalka Maragkacca ee Faafinta (ka dib marka wargaysku faafiyoy)
 <p>Kharashka codsiga/Foomka</p>	<p>Waa qaali</p>	<p>\$200 kharashka Xeerarka Ururka, \$50 kharashka xeraynta Shahaadada faafinta, \$600 – 1,200 kharashka daabacaadda faafinta wargeyska. waxaa loo baahan yahay heshiiska howl galaka.</p>
 <p>Diyaarinta Cashuurta</p>	<p>Dhibtiisu waa dhexdhexaad</p>	<p>Shirkadda LLC waxaa u furan fursado badan oo ku salaysan qaab dhismeedka ganacsiga iyo tirada xubnaha.</p>
 <p>Daynta</p>	<p>Waa yartahay Dayntu/ qatarka maaliyadda</p>	<p>Ganacsigu wuxuu si goonidiisa ah u yahay hay'ad sharci ah oo ka duwan mulkiilayaasha ganacsiga. Waxaa kooba daynta mulkiilayaasha waxayn maaliyad ahaan ka mas'uul yihiin inta ay ku maalgashadeen.</p>
 <p>Waxayabaha mar kasta la iska rabo</p>	<p>Haa – waxaa jira in la diiwaan geliyo wax kasta</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▶ Waxay ku hawlgalaan Heshiiska Hawlgalka 90 maalmood gudohood marka la xereeyo Shahaadada ururka lagu sameeyay. ▶ (waa <i>Khiyaar</i>) waxay qabtaan kulano xubnaha/ maareeyayaasha ▶ Waxay diiwaan geliyaan hawsha LLC iyo dukumentiga canshuurta. ▶ Waxay labdii sanaba hal mar xereeyaan warbixin xaqiijin ah/cinwaanka la cusboonaysiiyo
 <p>Ku haboon</p>		<p>Mulkiilayaasha raba in ay si gooni ah uga soocaan kaydhooda maaliyadeed iyo maalkooda kale midda ganacsiga, waxayna maamuli karaan waxa sida joogtada ah ee la iska rabo.</p>


SHIRKAD WEYN

Shirkad weyn inta badan waxaa loo isticmaalaa ganacsiyada waaweyn waxay leedahay awod ay ku bixiso (ku sso saarto) saamiyo. Saami wuxuu u taaganyahay in aad wax ku leedahay shirkadda. In la sameeyo shirkad waxay u baahantahay in la qoro warrqo badan, iyo kharash badan oo joogto ah, iyo sharciyo.

Shirkad kasta waa in ay leedahay xeer hoosaad, Guddi Agaasimeyaal iyo saraakiil. Kadib marka shirkadda la sameeyo, xubnaha saamiga ku leh waa in ay isugu yimaadaan shir weyne urur oo lagu ogolaado xeer hoosaadka ayna doortaan agaasimeyaal. Shirkad weyn ma aha wax ku haboon dhismo ganacsi dad bilaabaya ganacsi yar. LLC waxay siinaysaa ganacsiga yaryar dhamaan faa'idooyinka shirkad weyn aygoo aan u marin hawl badan, wayna fududahay sida loo maamulo iyo isbedelka lagu samayn karo.

Waxaa intaa dheer qaab dhismeedka shirkad weyn waa ku qatar badantahay qaxootiga ganacsiga bilaabaya oo aan loo ogolayn in ay shaqeeyaan. Haddii qof ganacsi bilabay uu yahay sarkaalka maamulaya shirkadda, ama uu mushahaar kaga qaato shirkadda, waxaa loo aqoonsanayaa shaqaale. Si aad u hubisid in ganacsigaaga loo sameeyay loona maamulo si waafaqsan sharciga federaalka iy sharciga Gobolka waa in aad raadisaa talabixin sharci iyo qareen difaac marka aad samaynaysid qorshaha ganacsigaaga. Hab canshuureedka shirkadaha waaweyn waa adagyahay kumana soo koobi karno tilmaamahaan.

DHIMAHA SHIRKADDA



Qof iibsaday saami shirkadeed oo ku leh boqolkiiba in saamiyada shirkada. Marka shirkad la sameeyo inta badan mulkiilayaasha ayaa ah saamilayda ugu horaysa.

Waa koox dad ah oo loo doortay in ay matalaan maalgashiga saamilayda. Agaasimayaashu waxay iyana noqonkaraan saamilay, qasab m ah in ay noqdaan. Guddigu waa in ugu yaraan ay leeyihiin hal agaasime. Agaasigamayaasha waxay mas'ul ka yihiin in ay dusha ka ilaliyaan ilduufka, ayna go'aan ka gaaraan arrimaha waawayn ee shirkadda.

Waxay mas'ul ka yihiin hawl galka maalinlayda ah ee ganacsiga waxayna awood u leeyihiin in hawlaha ganacsiga talabo ka qaadaan. **Saraakiisha waxa lagu tiriyaa in ay yihiin shaqaale dhanka sharciga waxaana looga baahnayahay in ay cadeeyaan in sharci ahaan ay ka shaqayn karaan Maraykanka.**

Shirkadda oo Kooban

 <p>Tirada Mulkiilayaasha</p>	<p>Hal mulkiile ama ka badan</p>	<p>Inta badan shirkadda weyn waxay leedahay mulkiilayaal badan oo loo yaqaan saamilay, laakiin waxaa sidoo kale samayn kara hal saamile.</p>
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	<p>Waxay u baahantahay dadaal badan si loo bilaabo</p>	<p>Kadib marka la xereeyo shahaadada shirkadda waa la qabtaa shir urureed oo lagu ansaxinayo sharciyada la rabo lana doorto Guddiga Agaasimayaasha.</p>
 <p>Kharashka codsiga/Foomka</p>	<p>Waa qaali</p>	<p>\$125 waa qarashka xeraynta shahaadada shirkadda oo la iska rabo si shaqada shirkaddu u bilaabato. Shirkad samaynteedu waxay rabtaa kharash aad u badan xagga sharciga iyo xagga xisaabaadka.</p>
 <p>Diyaarinta Cashuurta</p>	<p>Waa dhib badanyahay</p>	<p>Mulkiilayaasha ganacsiga waxaa lagu dhiiri gelinaya in ay la tashadaan xirfadle canshuurta yaqaan si ay u fahmaan waajibaadka canshuurta.</p>
 <p>Daynta</p>	<p>Aad bay u yartahay Dayntu/ khatarta maaliyadda</p>	<p>Ganacsigu wuxuu si gooni ah u yahay hay'ad sharciyayasan oo ka duwan mulkiilaha. Daynta mulkiilaha waxay ku egtahay lacagta uu ku maalgashaday ganacsiga.</p>
 <p>Waxayabaha mar kasta la iska rabo</p>	<p>Haa – wax aad u adag oo si joogta ah la iska rabo</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▶ Waxaa saamilayda loo qabtaa kulan sanadeed iyo kulamo gaar ah. ▶ Waxa Gudiga Agaasimayaashaa ay qabtaan shirar caadi ah iyo kuwa gaar ah. ▶ Waxaa shirkadda loo kaydiyaa diiwaanka lagu qoro qodobada shirka ka soo baxa iyo dukumentiga canshuurta. ▶ Waxay labadii sanaba ha mar xereeyaan warbixin xaqiijin ah/ Cinwaanka la cusboonaysiiyo
 <p>Ku haboon</p>	<p>Shirkadaha waaweyn oo leh mulkiilayaal badan una baahan maagelin badan rabana is ay soo saaraan ama iibiyaan saamiyaal.</p>	

Is bar bar dhig dhaqsa ah: Waa maxay nooca Dhismaha Ganacsi ee kugu haboon?

	Keli Lahaansho	Shirkad Guud	Shirkad Mas'uuliyad Kooban oo wadaag ah	Shirkad Mas'uuliyad Kooban	Shirkad Weyn
 <p>Tirada mulkiilayaasha</p>	Hal mulkiile	Laba mulkiile (La Wadaage) ama ka badan	Laba iyo wax ka badan oo ah La Wadaage (Lahaansho) Guud iyo La Wadaage kooban	Hal xubin ama ka badan	Hal Saamile ama ka badan
 <p>Bilaabidda Ganacsiga</p>	Waa sahal 	Sahal 	Adkaan meel dhexaad ah 	Adkaan meel dhexaad ah 	Aad u adag 
 <p>Kharashka codsiga/ Foomka</p>	Ma jiraan/ waa yartahay 	Ma jiraan/ waa yartahay 	Qaali meel dhexaad ah 	Qaali meel dhexaad ah 	Aad qaali u ah 
 <p>Diyaarinta Canshuurta</p>	Waa fudayd 	Waa meel dhexaad 	Waa meel dhexaad 	Wuxuu u dhexeeyaa adkaan meel dhexaad ah iyo adkaan 	Aad u adag in la fahmo 
 <p>Daynta shaqsiga ah</p>	Waa saraysaa 	Waa saraysaa 	Waa ku saraysaa (Ku badantahay) La Wadaage Guud 	koobanyahay 	koobanyahay 
 <p>Waxayabaha sida joogtada ah la iska rabo</p>	Ma jiraan 	Ma jiraan 	Qaar 	Qaar 	Aad u balaaran 

ISKAASHATADA SHAQAALAHA

Iskaashatada shaqaalaha waa nooc ganacsi oo cusub oo la hindisay oo ay leeyihiin shaqaaluhu iyaguna ay maaamulaan ganacsiga. Shaqaalaha ayaa inta badan isku biiriya lacagta lagu bilaabayo iskaashatada si ay xubin uga noqdaan una helaan qayb ka mid ah faa'idada. Qaabkaan shaqale kasta wuxuu leeyahay awood cod bixin marka ay timaado go'amada muhiimka ah ee ganacsiga sida ogolaanshaha daynta, qandaraaska, iyo aqbalaadda xubno cusub.

Iskaashato waxaa loo abuuri karaa mid kasta oo ka mid ah qaab dhismeedka ganacsiga ee tilmaamahaan aan ku soo sharaxnay oo ay ku jiraan shirkad, LLC, ama Shirkad weyn. Inta badan iskaashato waxay isticmaashaa qaab dhismeedka LLC waayo waa la badbadali karaa waxayna ku kacaysa kharash yar maraka loo eego shirkadda weyn iyo shirko, dad badan ayaa mulkiile ka noqon kara si sharci ah. Iskaashato LLC ah xubnaha ka midka ah waxaa ku waajibaya dayn kooban. Iskashatada waxa laga yaabaa in ay difaac siiso qaxootiga aan sharci haysan in laga faa'idaysto iyadoo mushahaarkooda la xadayo ama si kale loogu xad gudbo marka ay iskood u shaqaynayaan.

[New york waxay leedahay sharci Shirkadaha Iskaashatada u Gaar](#) ah oo la siiyay xeerar iyo xaalad gooni ah oo la xiriirta xubnaha, saamiyada iyo sida loo qaybinayo faa'idada iyo qasaaraha. Haddii aad rabtid faahfaahin dheraad ah akhri qaybta Hagaha.

Noocyada Ganacsiga

Sida caadiga ah shirkad weyn, LLC ama shirko, inta aad mulkiyad ku leedahay shirkadda waxy ku xirrantahay inta mulkiile kasta ku maalgashaday shirkada weyn.

Iskaashatada Shaqaalaha

Mulkiilenimada Iskaashatada shaqaalaha waxay ku xirranatahy in laga shaqeeyo ganacsiga. Inta badan qof kasata intuu gashaday waa isku mid.

DHAAR QORAAL AH

Warbixin qoraal ah oo la saxiixay ayaa waxaa caddaynaya qof si sharci ah ruqsad loo siiyay sida nootaayo.

Guddiga Agaasimayaasha

Waa Koox dad ah oo loo doortay in ay matalaan saamilayda shirkadda ayna qabtaan kor kalasocoshada ganacsiga ayn gaaraan go'amada waaweyn.

Macaamiil

Waa qof ama ganacsi uu qandaraasle xor ah siiyo adeeg.

Qof wax cusub isku daya in uu bilaabo

Waa qof isku duba rida kana shaqeeya ganacsiyiisa.

Shaqaale

Qof ama ganacsi mas'uul ka ah mushahaarka iyo xaaladda shaqaalenimo ee qof kale.

Lambarka aqoonsiga canshuur bixiyaha ee shaqsiga ah

Waa lambar Hay'adda Dakhliga Gudaah ay siiyaan dadaka aan la siin karin lambarka caymiska bulshada (SSN) laakiin raba in ay bixiyaan canshuur.

Hay'adda Dakhliga Gudaah (IRS)

Wakaaladda dawladda federaalka ah oo mas'uulka ka ah ururinta canshuurta federaalka.

Dayn

Waa inta ay le'egtahay mas'uuliyadda sharciyeed ama maaliyadeed ee dhibka ka yimaada ganacsiga.

Waa xubin

Shirkadda daynta kooban (LLC) mulkiilayaasha waxaa loogu yeeraa xubno.

Saraakiil

Saraakiishu waxay qabtaan howlaha maalinlaha ah ee shirkadda. Waxaa magacaaba Guddiga Agaasimayaasha, saraakiishu waxay noqon karaan asaasayaashaa/mulkiilayaasha iyo qaybo kamid ah shaqaalaha shirkadda.

Shirko

Waa qaab dhismeed ganacsi oo laba qof ama in ka badan ay wadaagaan ganacsi. Marka laga hadlayo shirko guud, La Wadaagayaashu waxay qayb ka qaataa mas'uuliyadda maamulka, faaiidada iyo khasaaraha ganacsiga. Qaar ka mid La Wadaagayaasha Shirko kooban waxay wax ka maamulaan ganacsiga qaarkoodna waxay maalgashadaan ganacsiga laakiin La Wadaagayaasha oo dhami waa mulkiilayaal.

Mulkiile

Mulkiilaha Ganacsiga

Saamilay

Saamile waa qof ka iibsaday saami shirkad yar ama shirkad weyn. Saamilaydu waxay leeyihiin qayb le'eg saamiga ay ku maalgashadeen shirkadda weyn.

DUKUMENTIGA MUHIIMKA AH

Xeerarka ururka

Waxaa loo baahanyahay Dukumenti sharaxaysa magaca shirkadda Daynta Kooban (LLC) iyo cinwaanka degmada si loo sameeyo shirkad LLC ah. Waxaa LLC la sameeyaa marka la xeraynayo Xeerarka Ururka ama waqti dambe sida ku xusan Xeerarka Ururka oo aan ka badnayn 60 maalmood ka bilaabata taariikhda la xereeyo.

Waxaa laga xereeyaa Waaxda Gobolka

► **Shirkad Dayn Kooban**

Warbixin Sannadle ah

Labadii sanaba hal mar LLC yada ka jira Gobolka NYS iyo shirkadaha waaweyn waxaa laga rabaa in ay xereeyaan warbixin iyo in ay bixiyaa qarashka xeraynta oo ah \$9 si loo xaqiijiyo cinwaanka ganacsiga.

Waxaa laga xereeyaa Waaxda Gobolka

► **Shirkad Dayn Kooban** ► **Shirkad Weyn**

Xeer Hoosaadka

Waa dukumenti qoran oo sheegaysa sida ay u howgelayso Shirkaddu warbixinta waxaa ku jirta sida loo xulanayo agaasimayaasha, sida loo qabanayo shirarka, iyo waxa ay yihiin xuquuqda, shaqooyinka iyo awoohada saamilayda, agaasimayaasha, iyo saraakiisha.

Waa in nuqul lagu reebaa shirkadda

► **Shirkadda Weyn**

Shahaadada magaca la qaatay

Waa foom la rabo keliya marka magaca ganaqcsigu ka duwanyahay magaca mulkiilaha.

Waxaa laga xereeyaa Xafiiska Xoghaynta Degmada

► **Keligii Mulkiile** ► **Sharko Guud**

► **Waa hay'ad kasta oo ku hawlgasha magac ka duwan keeda sharciga ah**

Certificate of Incorporation

Waa dukumenti sheegaysa magaca iyo cinwaanka shirkadda weyn. Jiritaanka Shirkadda weyn waxay bilabanaysaa taariikhda la xereeyo shahaadada shirkadda ama taariikh dambe (90 maalmood gudood taariikha la xereeyay) sida ku qoran shahaadada shirkadda.

► **Shirkad weyn**

Shahaadada shirko Kooban

Waa foom soo bandhigaya magacyada iyo warbixinta (La Wadaage) yada ee wada gelaya heshiis shirko kooban.

Waxaa laga xereeyaa Waaxda Gobolka

► **Shirko kooban**

Shahaadada Faafinta

Waa foom dhaar qoraal ah oo aad u gudbisid Gobolka oo sheegaysa in aad u hogaansantay faafinta wargayska ee loo baahanyahay si aad u bilowdid Shirko Kooban LLC (eeg bogga 19 iyo 20). Shahaadada Faafinta waa in la xereeyaa 120 maalmood gudood kadib marka la xereeyo shahaadada Shirko Kooban ama Xeerarka Ururka.

Waxaa laga xereeyaa Waaxda Gobolka

► **Shirko Kooban**

► **Shirkad Dayn Kooban**

I-9, Foomka xaqiijinta xaq u yeelashada shaqo

Waa foom looga baahanyahay shaqaalaha oo dhan in ay cadeeyaan in ay si sharci ah uga shaqayn karaan Maraykanka. Loo shaqeeyahaaga waa in uu soo qaataa Foomka I-9 uuna u diyaariyaa in ay baaritaan ku sameeyaan saraakiisha Dawladda Maraykanka ee awoodda loo siiyaya.

Heshiika Hawl galka

Wuxuu go'aamiyaa xuquuqda, awoodda, kala doorashada, xadaynta iyo mas'uuliyadda xubnahooda, maamulayaasha, shaqaalah iyo wakiilada. Heshiika hawl galka waxaa la geli karaa kahor ama 90 maalmood gudood kadib marka la xereeyo Xeerarka Ururka.

Waa in Nuqul lagu reebaa LLC

► **Shirkad Dayn Kooban**

Heshiis Shirko

Waa wax lagula talinayaa Shirko Guud waana laga rabaa shirko kooban, waxay samaynaysaa oo caddaynaysa isku duba ridka, xuquuqda, iyo waajibaadka inta ku shirkoowda ganacsiga.

► **Shirko Guud** ► **Shirko Kooban**

Kayd Waxbarasho

Wakaaldaha Dawladda ee Gobolka New York

Department of State, Division of Corporations, State Records, and UCC

www.dos.ny.gov/corps/

War bixin ku saabsan iyo qaabka foomku yahay iyo dukumenti kale oo sharci ah oo la siga baahan karo si loo furo loona ballaariyo ganacsi laga bilaabay Gobolka New York.

Haybadda horumarinta gobolka, barnaamijka kaalmaynta bilabaha ganacsiga

esd.ny.gov/entrepreneurial-assistance-program

Barnaamijka bilaabaha ganacsiga (EAP) wuxuu ka sameeyaa xarun meelaha ay dadka deegaanku degganyihiin ee gobolka New York oo dhan si loo siiyo tilmaamo, tababar, gargaar farsamo iyo adeeg kaalmo dadka dhowaan bilaabay ganacsiga ama raba in ay ganacsi bilaabaan.

Xafiiska dada Maraykanka cusub ah

1-800-566-7636

www.newamericans.ny.gov/business

Xafiiska dadka Maraykana cusub wuxuu leeyahay 27 xarummod oo leh fursdo gobolka New York oo dhan oo siisa qaxootiga waxbarasho iyo kady dhaqaale oo ay ku jirto kaalmaynta ganacsiga yar yar.

Xarunta horumarinta Ganacsiga Yaryar

1-800-732-7232

www.nysbdc.org/

Xarunta Horumarta Ganacsiga yayar ee New York waxay leedahay shabakad 24 xarun goboleed (NYS SBDC) oo siisa ganacsatada New York talabixin ganacsi oo tayo sare leh iyo tababaro bilaash ah ama kharash yar oo la siinayo gacstada bilowga ah ama doonaya in ay hagaajiyaan waxqabadkood, si bilaash ah.

Wakaaldaha Dawladda Magaalada New York (NYC)

Waaxda Arrimaha Macaamiisha, Xafiiska Awoodsiinta Maaliyadeed

www.nyc.gov/site/dca/partners/financial-empowerment.page

Waxbarasho maaliyadeed iyo talo bixin loola jeedo in lagu awoodsiyo laguna ilaaliyo dadaka New York ee dakhliga hoose oo raba in ay kor u qaadaan hantidooda oo si wanaagsan uga faa'idystaan aqoonta (kaydka aqoonta) maaliyadda. Waxa ka mid ah in la helo warbixin ku saabsan hab bangi oo la awoodi karo iyo in ay helaan canshuur dhaaf kor u qaadi karta dakhligooda.

Adeegga Ganacsiga Yaryar (SBS)

<https://www1.nyc.gov/nycbusiness/>

Waxbarasho bilaash ah, siminaar, talo bixin, kaalmo la siiyo bilaabaha raba in uu ganacsiga sameeyo, ka shaqeeyo oo uu balaariyo ganacsi ku yaal Magaalada New York.

Adeegga Ganacsiga Yaryar (SBS) oo ah ganacsiga qaxootigu bilaabeen

www1.nyc.gov/nycbusiness/article/immigrant-business-initiative

SBS waxay ku siisaa waxbarasho ganacsi, kaalmo maaliyadeed, adeeg sharci oo bilaash ah iyo luuqado badan oo si bilaash ah laguugu adeego Magaalada New York oo dhan.

Ururada Magaalada New York (NYC)

Maktabadda dadweynaha ee Brooklyn, adeegga Ganacsiga Yayar iyo kuwa bilowga ah.

www.bklynlibrary.org/business/small-business

Meelo badan oo kaydka aqoonta ee Brooklyn waxay leeyihiin siminaaro, fasalo, iyo kaalmo qof ka qof ah ee luqadaha Ingiriiska, Isbaanishka, Ruushka, Kryoolka oo bikow ah, ama socda ama ganacsiga kor u qadaya.

Xarunta Adeeg Gaarsiinta Shabakadda Ganacsiga

www.bocnet.org

Urur u sameeya horumarin habaysan iyo adeegyo ganacsatada aadka u yaryar iyo ganacsatada yaryar ee magaaloolyinka Bronx, Brooklyn, Manhattan, Queens, Jasiiradada Staten iyo bulshooyinka aan helin adeega ay ka mid tahay amaahda lasiiyo ganacstada yaryar, xanaanada caruurta ee guryaha lagu sameeyo, iyo mashaariicda qaxootiga ee ganacsatada aadka u yaryar.

Adeegga CAMBA ee Gnacstada Yaryar

718-287-2600

www.camba.org

Latashiyo qof ka qof ah, siminaaro ganacsatada yaryar, talabixin ganacsi, isku xirika dadka leh ganacsiyada kale ee yaryar iyo amaahda ganacsiyada.

Mashruuca Horumarinta Bulshada, Ururka Gargaarka xagga Sharciga

212-426-3000

www.legalaidnyc.org/civil-practice-pro-bono-projects

Tababaro loo qabto u doodayaasha iyo shacabka macaamiisha ah ee xaqa u leh ee ku nool xaafadaha oo dhan. Arrimahaas waxaa ka mid ah bilaabidda ganacsi yaryar, saxiixidda heshiis kiro ee rug ganacsi, difaacidda ganacsiga iyo hantida shaqsiga ah. Tababaradu waxay ku baxaan Ingiriis iyo Isbaanish.

Kayd Waxbarasho

Xarunta Waxbarista reer Magaalka

www.welcometocup.org

Daabicidda buugg xayaysiin iyo buug gancan qabsi oo yareeya yaabka ka dhasha siyasadaha adag iyo habka raaca, waxaa ka mid ah Hage loo sameeyay shaqaalaha Iskaashatooyinka Magaalada New York (NYC).

Ururka Hebrew ee Amaahda Bilaashka ah

www.hfls.org/loan-programs/microenterprise/

Amaah aan lahay dulsaar oo la siiyo dadka deggan New York, Long Island, Westchester, oo dakhligoodu yaryahay ama yahay meel dhexaad, si ay u ballariyaan ganacsiga.

Mashruuca Sharciga gancsiga bilowga ah ee xaafadaha oo ay leedahay

Xarunta Caddaaldda ee NYC

212-382-6633 (xarun)

212-626-7383 (Isgaarsiin telefon bilaash oo sharci ah)

nelp@nycbar.org

Adeeg sharci oo la siiyo ganacsatada aadka u yaryar ee dakhligoodu hooseeyo ama meel dhexaad yahay si ay u bilaabaan ganacsi, ay ka mid tahay arrimaha cashuurta, qandaraasyaada, heshiisyada, wad xaajoodka heeshiiska ijaarka rugta gancsiga, xuquuqda daabacaadda, calaamadda ganacsiga iyo sharciga lahaanshaha iyo ogolaansho gaarka (batante) ka ganacsiga.

Shirkadda Dib u soo Noolaynta Horumarinta Dhaqaalaha

www.renaissance-ny.org

Hay'ad Maaliyadeed oo qaabilsan Horumarinta Bulshada ayaa aad ugu hawlan sidii isbeddel loogu samayn lahaa ganacsiga qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ama meel dhexaad yahay ee bulshada New York si ganacsigooda u helo amaah dulsaarkeedu hooseeyo iyo barnaamijyo lagu tababarayo ganacsatada bilowga ah.

Adeeg sharci oo iskaa wax u qabso ah

347-521-5729

www.volsprobono.org/projects/microenterprise-project

Waxay ka kaalmaysaa mulkiilayaasha ganacsiga yaryar iyo ganacsiga billowga ah ee aadka u yaryar in ay helaan adeeg sharci oo taya sare leh, bilaashna ah oo ay bixinayaa shaqaale iyo shabakado qareenna ah oo wada shaqeeya, bixiyana adeeg sharci oo bilaash ah.

Kayd aqooneed ee Iskaashatada Magaalada New York (NYC)

Iskaashatada Shaqaalaha Cagaaran

www.greenworker.coop

Waxay bixisaa tababar degdeg ah oo 5 bilood ah iyo barnaamij kaalmo ah oo caawimaya kooxo niyad sare leh oo bilaabay ganacsi cagaaran oo shaqaaluhu leeyahay oo isticmaalaya dadaal xoog leh oo isugu jira tababaro, il kala socosho, iyo adeeg farsamo.

SHABAKADDA ISKAASHATADA MAGAALADA NEW YORK (NYC NOWC)

212-390-8178 (Isgaarsiin Telefoon toos ah)

www.nycworker.coop

Horumarinta hoggaanaka, tababarro, siminaaro, kaalmo ganacsi, iyo caawimaad farsamo oo la siiyo shaqaalaha iskaashatada iyo xirfadaha ganacsiga iskaashatada.

Mashruuca caddaaladda Shaqaalaha – Wadadaas ku tag New York

347-889-6347

www.workersjustice.org

Ururka xuquuqda qaxootiga wuxuu kaloo ka shaqeeya arrimaha la xiriira sidii loo abuuri lahaa shaqooyin raaga iyagoo u samaynaya iskaashatooyinka shaqaluhu leeyihiin horumarin, kaalmayn iyo kor u qaaid.

Qaalabka ku Xiriisan intaarnetka kumbiyuutarka:

Ganacsiga New York ee Degdegga ah

www.businessexpress.ny.gov

Wuxuu kaa kaalmeeyaa sidii uu u hagi lahaa ganacsiga iyo aqoon xirfadeedka aad u baahantahay. Buuxi/Ka jawaab su'aalo qoraal ah iyo xujooyin Ganacsi oo ku siinaya wax kasta oo aad u baahantahay in aad ganacsi bilowdo.

Barta Ganacsiga ee NYC

www1.nyc.gov/nycbusiness

Su'aalo talaabo talaabo ah

Buuxi/ka jawaab su'aalo talaabo talaabo ah, raadi liis habaysan ee magaca magaalada, gobolka, shatiga federaalka iyo ogolaanshaha aad u baahantahay si aad u bilowdid una howlgelisid ganacsigaaga si ku salaysan shaqooyinka gaarka ah ee aad ku shaqaysid.

Cibiraha Abaal Marinta

Buuxi/ka jawaab, raadi liiska abaal marinta dowladda ee suurta galka ah iyo canshuur dhaafka ganacsigaagu muddan yahay.

